# Waa maxay Sonkorow?

**Sonkorowgu wuxuu dhacaa marka jirku dhibaato ku qabo isticmaalka sokorta (glucose) si uu tamar uga helo.** Jirku wuxuu u baahan yahay insulin si uu gacan uga geysto ka qaadista sokorta cuntada una gasho unugyadeena. Haddii sokortu ***aysan*** geli karin unugyada, waxay ku ururtaa dhiigga taasoo dhaawac u geysata jirka.

## Waa maxay Sonkorowgga Nooca 1-aad?

Waa cudur is-difaacis ah oo keena in jirku joojiyo samaynta insuliinta ama uu sameeyo tiro aad u yar oo insuliin ah. Sonkorowga nooca 1-aad lagama hortagi karo oo waa in lagu daaweeyaa insuliin maalin kasta. Taariikhda qoyska ee qofka waa halis weyn oo sababi karta cudurka.

## Waa maxay Marxaladdaha uu maro Sonkorowga Nooca 1-aad?

Sonkorowga Nooca 1-aad wuxuu maraa saddex marxaladood:

- Maxaladda 1-aad: Wax calaamado ah ma muuqdaan, heerka sokorta dhiiggu waa caadi.
- Maxaladda 2-aad: Wax calaamado ah ma muuqdaan, laakiin sokorta dhiigga way is beddeleysaa, weyna adag tahay in la xakameeyo
- Maxaladda 3-aad: Calaamado ayaa soo muuqda, heerka sokorta dhiiggu aad buu u sarreeyaa, waxaana bilaabma ku-tiirsanaanta insuliinta.

## Waa maxay Calaamadaha Digniinta ee Sonkorowga Nooca 1-aad?

Kaadida oo soo noqnoqota, haraad badan iyo af qalalan, rabitaanka cuntada oo kordha (gaajo aad u daran), isbeddel lama filaan oo aragga ah, daal/hurdo badan,uUr miro leh oo ka soo baxa neefta, iyo miisaanka oo si aan la fasiri karin u yaraada.

Soo ifbaxa calaamadaha waxay noqon karaan si kedis ah, gaar ahaan carruurta yaryar.

## Waa maxay Baaritaanka Sonkorowga Nooca 1-aad?

Baaritaanka sonkorowga nooca 1-aad wuxuu ka dhigan yahay in la sameeyo baaritaan kahor inta aan calaamadaha soo muuqan oo waxay ka koobnaan kartaa baaris dhiig oo laga baaro calaamado lagu magacaabo unug-difaaceed is-difaaca, ama baaritaan dhiig oo lagu cabbirayo heerka sokorta ee dhiigga ku jirta. Baaritaanka unug-difaaceedyada is-difaaca jirka wuxuu kaa caawin karaa in la aqoonsado nooca 1 sonkorowga waqti hore (kahor inta aan insulin loo baahan) oo wuxuu suuragal ka dhigi kartaa inuu daahiyo bilowga calaamadaha iyadoo daryeelka la bilaabayo si dhakhsi ah.

## Waa maxay Sonkorowga Nooca 2-aad?

Cudur uu jirku sameeyo insulin, balse aan soo saarin in ku filan ama uusan u isticmaali karin si wax ku ool ah. Noocan cudurka ah ayaa inta badan lagu arkaa dadka waaweyn, hase yeeshee carruur iyo dhallinyaro badan ayaa hadda la kulmaya sonkorowga marka loo eego waqtiyadii hore. Waxaa inta badan lala xiriiriyaa arrimo halis ah sida inaad lahaato miisaan aan caafimaad lahayn ama firfircooni la'aan, balse sidoo kale asalka qowmiyadeed iyo taariikhda qoyska ayaa kordhin kara halista.

## Maxaad Samayn Karta Si Aad Gacan Uga Geysato Ka Hortagista Sonkorowga Nooca 2-aad?

Cun Cunto Caafimaad

Noqo Mid Firfircoon

Xakamee Miisaank

## Waa maxay xaaladaha Ka-hor Sonkorowga?

Kahor inta aan dadka laga helin sonkorowga nooca 2-aad, badankood waxay yeeshaan xaalad la yiraahdo xaalada ka-horeysa sonkorowga, taas oo ah heerka sokorta dhiiggodu uu ka sarreeyo sida caadiga ahayd, balse uusan weli gaarin heerka ugu sareeya ee loo maleeya in ay sonkorowga qabaan. Xaaladaha sonkorowga ka hor waxay u horseedi karaan sonkorowga nooca 2-aad. Dhaqtarkaaga daryeelka kowaad ayaa ku siin kara tallaabooyin kaa caawin kara in aad joojiso ama gaabiso kobaca xaaladaha sonkorowga ka hor.

Goobo maqaarka ah oo madoobaada (acanthosis nigricans) waxay noqon kartaa calaamad hore oo

muuqata oo muujinaysa xaaladaha sonkorowga ka hor ama nooca kobaca cudurka.

## Waa maxay Calaamadaha Digniinta ee Sonkorowga Nooca 2-aad?

Kaadida oo soo noqnoqota, haraad badan, rabitaanka cuntada oo kordha (dareemida gaajo aad u daran), daal iyo tamar-yari (daal badan), aragga oo daciifa, goyno/nabarro aan si dhakhso ah u bogsan, iyo dareen gariir/xanuun/kabuubyo ah oo ku dhaca gacmaha iyo cagaha.

## Waa maxay Baaritaanka Sonkorowga Nooca 2-aad?

Baaritaanka sonkorowga nooca 2-aad badanaa wuxuu ka kooban yahay baaritaan dhiig oo lagu cabbiro heerka sokorta dhiigga Isla baaritaankaas ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu ogaado xaaladaha sonkorowga ka hor. Baaritaanka wuxuu ogaan karaa xaaladaha sonkorow ka hor ama sonkorowga waqti hore, ka hor inta aan calaamadaha digniinta aysan soo ifbixin, wuxuuna yareyn karaa halista caqabadaha nolosha halista geliya ama isbitaal-dhigista

## Kawaran Haddii Ilmahaygu uu Leeyahay Calaamado Digniin Ah ama Laga Helo Cudurka?

Booqo dhaqtarka guud ee ilmahaaga isla markiiba haddii ilmahaagu uu muujiyo calaamado digniin ah. Weydii haddii tijaabooyin ama baaritaanno dheeraad ah ay habboon yihiin iyadoo lagu salaynayo calaamadaha ama arrimaha halista ah. Haddii ilmaha laga helo sonkorowga, la shaqee bixiyaha daryeelka koowaad ee ilmahaaga si aad u dejisaan qorshe daaweyn ah. Daryeelka hore wuxuu kaa caawin karaa in aad ka hortagto cudur halis ah.

**Wixii macluumaad dheeraad ah:** diabetes.org ● breakthrought1d.org

TN Department of Education

*Waxaa la sameeyay iyada oo la kaashanayo Tennessee Department of Health*

© Tennessee Department of Education